REAL LEARNING FOR REAL LIFE

WAA MAXAY COMMON CORE IYO SMARTER BALANCED?

Common Core waa qaybo heerar waxbarasho oo sare ee xisaabta iyo farshaxanada luuqadda Ingiriiska oo loogu talogalay inay si fiican ugu diyaariyaan ardayda K-12 guulasiga kuuliyadda, shaqada iyo nolosha. Heerarka, kuwaasi oo u dejinaya filashooyin waxbarasho ardayda heer fasal oo kasta, waxa soosaaray oon si iskaa ah u hirgaliyey in kabadan 40 gobol. Waxay yihiin Heerarka Barashada K-12 ee Washington.

Smarter Balanced waa imtixaanka cusub ee ardaygu gali doonaan fasallada 3-8 iyo dugsiga sare ee Washington. Imtixaanada kusalaysan kombiyuutarka waxa loogu talogalay in lagu cabbiro xirfadaha sida cilmi-baarista, dhagaysiga iyo sababaynta xidhiidhka. Imtixaanadu waxay u baahan yihiin ardaydu inay ku isticmaalaan aqoontooda dhibaatooyinka dhabta ah, taasi oo ka caawin doonta inay guulaystaan kadib marka ay qalinjabiaan.

WASHINGTON WAXAY TAAGEERTAA HEERARKA COMMON CORE

Tirakoobka Febraayo 2015 ee 647 Codbixiyayaasha gobolka Washington 68% taageero ayey u muujiyeen heerarka waxbarasho ee guud ee farshaxanada luuqadda Ingiriiska iyo xisaabta dugsiyada dadwaynaha.

3 SHAY EE UGU SARREEYA EE AY TAHAY INAAD KA OGAATO COMMON CORE

WAXBARASHADA JOOGTADA EE LAGA FILAAYO DHAMAAN ARDAYDA

Common Core ka hor, dhamaan 50-ka gobol waxay lahayeen rajo kala duwan oo ku saabsan waxa loo baahan yahay in ardayda ogadaan iyo waxa ay awood u yeeshaan in ay sameyaan darajo kasta. Common Core wuxuu dhamaan ardayda siiyaa heerarka barashada iyo rajada, iyadoo aan la fiirinin meesha ay ku nool yahiin.

HEERAR CADCAD OO AHAMIYADDA SAARA GARASHADA QOTADA DHEER

Common Core wuxuu si qotodheer u sii gala mawduucyo dhawr ah oo shiishka saaraa kobcinta fahamka qotada dheer ee ardayda ee aragtiyaha muhiimka ah. Mid kasta oo ka mid ah heerarka wuxuu ku kor dhisan yahay midka kale, taasoo ardayda u ogolaata in ay xeeladaha iyo aqoonta ay ka barteen darajadii la soo dhaafay ku dabaqaan xaaladaha nolosha-dhabta ah.

DHISIDDA XIRFADAHA FEKERKA DHABTA EE ARDAYDU AY UGU BAAHAN YIHIIN SUUQA SHAQADA

2013, Washington waxay lahayd 25,000 oo shaqooyin u baahan shaqaale xirfad sare oo aan la buuxin – waxaana la saadaalinayaa in tiradaasi labanlaabmi doonto 2017. Common Core wuxuu shiishka saaraa dhisidda iyo isticmaalka xirfadaha dhabta ah ee ardaydu uga baahan yihiin inay kula tartami karaan dhaqaalaha adduunka ee cusub.



SU'AALAHA BADANAA LA ISWAYDIIYO KUSAABSAN COMMON CORE IYO SMARTER BALANCED

Maxay tahay sababta Common Core kuugu tahay muhiim adiga iyo cunugaada?
Common Core waxaa laga helaa bar tilmaameedyo, ama heerarka la tiigsado ee xagga tababaridda iyo barashada heerka darajo kasta. Heerarka waxbarasho waa sharraad kooban, oo joogto ah ee waxa ardaydu ay tahay inay ogaadaan awoodaana inay sameeyaan. Waxay ka caawiyaan waalidiinta iyo macalimiinta inay wada shaqeeyaan si ay u hubiyaan ardaydu inay leeyihiin fursadaha ay uga baahan yihiin guulasiga dugsiga iyo nolosha.

Common Core miyuu ka fiican yahay heerarkii tacliineed ee Washington ee hore?
Haa, heerarka Common Core aad ayey uga adag yihiin heerarka barashada Washington ee hore ee xisaabta iyo farshaxanada luuqadda Ingiriiska. Waxay shiishka saaraan casharrada muhiimka ah ee diyaar u ahaanshaha shaqada iyo kuuliyadda iyo xirfadaha, oo ay kujiraan fekerka dhabta iyo masalo xallinta oo dheeraad ah. Heerarka waxay la jaan qaadayaan heerarka barashada ugu fiican Maraynkanka iyo caalamka.

Maxay Washington u hirgalisay heerarka Common Core?
Washington waxay hirgelisay Common Core maxaa yeelay heerarkaan iyo ilaha tababarka isku toosan iyo imtixanaadka waxay ardayda ku kaalmeyn doonaan in ay si wanaagsan isugu diyaariyaan kulliyadda iyo shaqada. Iminka Washington:

- Waxaynu leenahay mid kamid ah galdaloolooyinka kasbasho ee ugu ballaadhan Maraykanka, waana mid kamid ah dhawr gobol oo kaliya halkaasi oo ay sii waddo inay korto;
- In kayar kalabadh ardaydeena qalinjabisay waxay diyaar u yihiin kuuliyad (sida uu cabbiray imtixaanka galista kuuliyaddu); iyo
- 2018 marka la gaadho, laba kamid ah saddex shaqo oo kasta Washington waxa la saadaaliyey inay u baahan doonto digrii kuuliyadeed ama shahaado.

COMMON CORE EE JADWALKA WAKHTIGA WASHINGTON

2011: ayey Washington si rasmi ah u hirgalisay Common Core

2012: Goboka wuxuu qalab siiyay macalimiinta iyo dugsiyada si ay u bilaabaan fulinta heerarka

2013-14: Heerarka Common Core waxa lagu dhigayey dugsi kasta

2014: Imtixaanada Smarter Balanced ee cusub ee xisaabta iyo farshaxanada luuqadda Ingiriiska waxa lagu tijaabiyey dugsiyada Washington

2015: Ardaydu waxay galaan imtixaanada Smarter Balanced ee cusub gu'ga

Ma dhici doontaa in dugsiyada iyo macalimiinta weli sii kantaroolaan waxyaabaha wax lagu barto iyo go'aamada kale ee hoose?
Haa. Qaabka heerarka barashada Common Core loo baro wuxuu khuseeyaa 295 degmo dugsiyeed iyo inta kabadan 2,000 dugsi ee Washington. Dugsi ama degmo kastaa waxay sii wadi inay yeelato jajabnaanta inay xulato agabka barista iyo khayraadka ee sida ugu fiican u buuxinaya baahiyaha ardaydiisa.

Imtixaanada Smarter Balanced ee cusub miyey ka adkaan doonaan imtixaanada gobolka ee wakhtigaan?
Haa, laakiin taas waxa keenaya waxay waafaqsan yihiin heerar waxbarasho oo cusub oo aad u adag, kuwaasi oo loogu talogalay inay si fiican ugu diyaariyaan ardaydu inay diyaar u noqdaan kuuliyadda iyo shaqada marka ay qalinjabiyaan. Imtixaanadayada gobolka wakhtigaan waxay cabbiraan xirfadaha aasaasiga ah.

Miyey tirada ardayda buuxinaya heerarku ka hoosayn doonaan imtixaanada Smarter Balanced?
Ma aha tufaax-tufaax barbardhig. Waxa jira heerar waxbarasho iyo imtixaano cusub, markaa waa inaan la isbarbardhigin buundooyinka cusub ee Smarter Balanced iyo kuwii hore. Maadaama Heerarka Gobolka Common Core ay aad uga adag yihiin kii hore ee heerarka barashada gobolka, buundooyinka imtixaanka ardaydu waxa dhici karta inuu ka hooseeyo inta hore waxa ardayda, waalidiinta iyo macalimiintu ay hore u arki jireen. Imtixaanada Smarter Balanced waxay u dhigayaan qiyaas cusub waxqabadka ardayda, isagoo cabbiraya xirfadaha iyo aqoonta ardaydu ay u baahan yihiin si ay u guulaystaan kadib dugsiga sare, oo ay kujiraan dhib-xallinta, qoraalka iyo fekerka dhabta ah.

Halkee ayaan ka ogaan karaa wax dheeraad ah oo kusaabsan Common Core Washington?
Fadlan booqo **www.ReadyWA.org** iyo nagu darso Facebook (**www.facebook.com/ReadyWA**).

READY WA .org

Taageerada la siiyo heerarka barashada isu diyaarinta-kulliyadda-iyo-shaqada